

XEERKA URURADA AAN DAWLIGA AHAYN EE 2019: Xog kooban oo kusaabsan u doodista [NGOs-ka]

Ururada aan dawliga ahayn ee ka shaqeeya gudaha Soomaaliya waxaa ay soo dhaweynayaan dejinta qaab shaqo oo sharci ah kaasi oo loogu talo galay ururada aan dawliga ahayn (NGOs) maadaama taasi taageereyso dadaal wanaagsan uuna yahay mid awooda inuu bixiyo biio wax awood siineysa oo loogu talagalay bixinta cawimaad baniaadaminimo iyo mid horumarineed gudaha Soomaaliya. xeerka ururada aan dawliga ahayn ee Soomaaliya ee 2019 waxaa uu qeexayaa xeer nidaamiye waadax ah oo loogu talagalay ururada aan dawliga ahayn, kaasi oo fududeyn doona xiriir wadda shaqayneed oo miro dhal ah oo u dhexeeya Dawlada iyo ururada aan dawliga ahayn waana mid guud marka la eego xaddigiisa. Waxaa intaasi dheer oo lagu talo bixinayaa in Xeerku uu doonayo inuu dhawro xaquuqda aasaasiga ah ee xorriyada isku xirnaanta dadka, xorriyada isu soo uruuridda dadka iyo xorriyatul qawlka, kuwaasi oo ah xaalado lagama maarmaan u ah in ururada aan dawliga ahayn ay u shaqeeyaan si wanaagsan oo habboon.

Si kastaba ha ahaatee, Xeerkan waxaa sidoo kale kujira **qodob** laga yaabo inay horjoogsadaan habsami usocoshada hawlaha ururada aan dawliga ahayn. **Qoraalkan Hoose, ayaa anagoo ah koox ka mid ah ururadda aan dawli ahayn oo isku dhafan qeybo badana matala – waxaan ku sharraxnay aragtiyaheena, waxaana soo jeedinay kaabis iyo wax ka bedel qodobadaasi lagu sameeyo.** Waxaan sidoo kale ku darnay tusaaleyaal laga soo qaatay sharuucda ururada aan dawliga ahayn ee dalal kale oo Afrikaan ah, kuwaasi oo laga yaabo inay muhiim noqdaan oo wax laga soo qaato.

Si waafaqsan heshiisyada caalamiga ah, ayaa waxaan ku talinaynaa:

1. In Xafiiska Xiriirinta Hawlaha ururada aan dawliga ahayn uu noqdo mid madax-bannaani hoosaad leh, kaasii oo uu maamulayo Guddiga ururada aan dawliga ahayn oo ka kooban wakiilada ururada aan dawliga ahayn, gudaha Wasaarada Qorsheynta, oo xiriirisa dhammaan arimaha ururada aan dawliga ahayn heer qaran iyo heerka dawlad goboleedyada intaba
2. Hannaan diiwaan galineed oo mid ah isla markaana fudud, kaasi oo dhiirgaliya in ururadu isdiwaan galiyaan, iyo buuxinta sharuudaha warbixin soo tebinta oo aan ahayn kuwo culus
3. Ururada aan dawliga ahayn waxay xor u yihiin inay doortaan shaqada ay qabanayaan maadaama ay waafaqsan tahay sharuucda Soomaaliya – oo ay dooran karaan meesha ay ka shaqeynayaan iyo arimaha ay ka shaqeynayaan
4. In meesha laga saaro xayiraadda dhibka keeni karta iyo hannaankabaaritaanka: ayadoo ururada aan dawliga ahayn ay tahay in lala xisaabtamo, ayaa hadana qodobadaan waxay si fudud u noqon karaan kuwo la siyaasadeeyo
5. In Xafiiska Xiriirinta Hawlaha ururada aan dawliga ahayn uu taageero sidii loo hirgalin lahaa in ururada waddaniga ahi ay kaalin wayn ka qaatan fulinta masharicda dalka ka socda, isla markaana ay taageeraan soo uruurinta macluumaadka iyo diyaarinta warbixinada kusaabsan siday u socdaan hawlaha gargaarka iyo waliba dejinta siyaasado arintaasi lagu xoojinayo hadii ay muuqato in aan balanqaadkaasi calamiga ah la hirgalin.

Xeerka ururada aan dawliga ahayn waa siyaasad muhiim u ah sidii loo xaqiijin lahaa in ururada aan dawliga ahayn ay taageeraan horumarka Soomaaliya iyo wax ka qabashada baahiyaha bini'aadamnimo. Xeerka noocaan ah waxaa uu muhiim u yahay hirgalinta faham loo dhan yahay iyo abuuridda biio sare u qaadda horumarka qaranka. Dukumiintigaan waxaa si wada jir ah u soo saaray Dalladda ururada aan dawliga ahayn ee Soomaaliya ee Somali NGO Consortium, fagaaraha the Nexus Platform iyo SONSA. Waxaanu soo dhaweyneynaa fursadan aragtiyaha loogu soo biirinaayo Xeerka ururada aan dawliga ahayn waxaana diyaar u nahay in aanu idinla wadaagno xog dheeraad ah iyo talooyinba markii loo baahdo.

Qodobka 1aad: Cinwaan Gaaban

Qodobka 2aad: Tarjumaad

Qodobka 3aad: Adeegsiga Xeerka

Fikradaha ururada aan dawliga ahayn	Waxyaabaha ay soo jeediyeen ururada aan dawliga ahayn
<p>Midowga Afrika waxaa uu si waadax ah u caddeeyay in dowladuhu aysan ku qasbin ururada inay isdiiwaan galiyaan si loogu ogolaado inay jiraan oo ay u shaqeeyaan si xor ah (Tilmaamayaasha ACHPR, Qod.11). 3.1 waxaa uu u adeegsanayaa dabaqidda Qodobkaan ururo farabadan oo aan tiradooda la dhammeyn karin oo aan lasoo koobi karin oo markii lala aqriyo qodobka 9.1.1, qeybtaan waxay soo rogeysaa isdiiwaangalin qasab ah inay sameeyaan dhammaan ururadu. Tani waa xaddidaad aan xaq ahayn oo liddi ku ah xorriyada isku xirnaanta dadka.</p>	<p>Qodobku waa inuu ogolaado in ururada aan rasmiga ahayn ay jiraan oo aan lagu qasbin sharuudaha isdiiwaangalinta. Ururada yaryar ee aan dawliga ahayn, ururada bulshada ee loo yaqaano CBOs, iyo ururada aan rasmiga ahayn waa in lagu soo daro liiska ururada laga reebay Qodobka sida waafaqsan qod.3(2).</p>

Qodobka 4aad: Ujeedooyinka Qodobka

Qodobka 5aad: Soo magacaabidda Diiwaangaliye Guud

Fikradaha ururada aan dawliga ahayn	Waxyaabaha ay soo jeediyeen ururada aan dawliga ahayn
<p>Tilmaameyaasha ACHPR waxaa ay si cad u qeexayaan in “arrimaha la xiriira kormeerka ururada ay kormeeri doonaan, haddii loo baahdo, hal gole oo u fuliya howlaheeda si dhexdhexaadnimo iyo cadaalad ah.” Ma cadda sababta Diiwaangaliyaha Guud oo u gudan doona</p>	<p>Ha la saaro qodobka Diiwaangaliye Guud oo soo reeba dhammaan shaqooyinkiisa loogu talagalay Xafiiska Xiriirinta Hawlaha ururada aan dawliga ahayn si loo xaqiijiyo inuu yahay mid madax bannaan uuna u bixiyo habraacyo maamul iyo kuwo kormeer oo aan laalaab badnayn aana daahin oo loogu talo galay ururada aan dawliga ahayn.</p>

<p>shaqadiisa la xiriirta Xafiiska Xiriirinta Hawlaha ururada aan dawliga ahayn ay usoo magacaabeyso Wasaarad kale. Xafiiska Xiriirinta Hawlaha ururada aan dawliga ahayn, oo uu xukumo Guddiga ururada aan dawliga ahayn, waa in uu ahaado hay'ada maamul ee qura ee mas'uulka ka ah dhammaan hawlaha diiwaangalinta ururada aan dawliga ahayn. Tani waxay uga dhigi doontaa hannaanada waadax dawlada iyo ururada aan dawliga ahayn.</p>	<p>Xafiiska Xiriirinta Hawlaha ururada aan dawliga ahayn waa inuu ogolaanshiyo u heysto inuu yahay mid madax-bannaani hoosaad ku hoos leh Wasaarada Qorsheynta. Guddi fulineed waa in sidoo kale la hirgaliyo si uu dusha ugala socdo Xafiiska Xiriirinta Hawlaha ururada aan dawliga ahayn (eeg hoos).</p>
--	---

Qodobka 6aad: Shaqooyinka iyo Waajibaadka Diiwaangaliyaha Guud

<p>Fikradaha ururada aan dawliga ahayn</p>	<p>Waxyaabaha ay soo jeediyeen ururada aan dawliga ahayn</p>
<p>Sida sare lagu soo xusay, Diiwaangaliyaha Guud waa inuusan lahaan awoodo maadaama hab-raaca ugu wanaagsan uu yahay inuu jiro hal xafiis oo wax xukuma, kaasi oo ah Xafiiska Xiriirinta Hawlaha ururada aan dawliga ahayn, oo hoos yimaadda guddiga ururada aan dawliga ahayn.</p>	<p>Kusoo dar qodob cusub oo lagu hirgalinaayo Guddi fulineed oo loogu talagalay Xafiiska Xiriirinta Hawlaha ururada aan dawliga ahayn iyo inuu kala taliyo Guddiga shaqooyinkii iyo wajibaadyadii uu qaban lahaa Diiwaangaliye Guud.</p> <p><i>Shaqooyinka xubnaha guddiga waa in lagu qeexo sharci gudihii waana inay noqdaan qaab-dhismeed qeexan oo ah usoo magacaabidooda Guddiga.</i></p> <p><i>Kuwaa waxaa kujira:</i></p> <ul style="list-style-type: none"> • <i>Dusha kala socoshada hirgalinta Qodobka</i> • <i>Bixinta talo siyaasadeed, qaabeynta sharuucda iyo habraacyada loogu talagalay Xafiiska Xiriirinta Hawlaha ururada aan dawliga ahayn</i> • <i>Dib u eegidda iyo ansixinta Xafiiska Xiriirinta Hawlaha ururada aan dawliga ahayn qorsheyaashiisa istaraatiijiyadeed, miisaaniyadihiisa, iyo warbixinadiisa sanadlaha ah</i> • <i>Soo magacaabidda shaqaalaha</i> <p><i>Xubnaha Guddiga waxaa soo magacaabaysa Wasaarada Qorsheynta kadib markii ay wada tashi la yeelato ururada aan dawliga ahayn. Xubnaha Guddigu waxay ka koobnaanayaan Guddoomiye, Guddoomiye Ku-xigeen, 2-3 kale oo wakiilo ah iyo ugu yaraan 2 wakiilo oo kale oo ka socda ururada aan dawliga</i></p>

	<p>ahayn. Sharuudaha xubnaha Guddiga:</p> <ul style="list-style-type: none"> • Waayo-aragnimo kusaabsan shaqadaas isla nooceeda • Inuu qofku yahay muwaadin • Dhaqan wanaagsan oo leh daacadnimo la xaqiijiyay <p>Mudada xilka ee xafiisku waa: 3-4 sano markiiba waxaase dib loosoo magacaabi karaa muddo kale oo isla intaas ah. Ka qaadida xilka xafiiska ee xubin ka tirsan guddiga waxay un ku imaan kartaa inuu asagu qofku is casilo asagoo qoraal istiqaalo soo gudbinaaya ama, Wasaarada (Qorsheyntu) inay xilka ka xayuubiso ayadoo sabab jirta u cuskanaysa taasoo ah sabab gaar ah, inuu xadgudub xafiiska ka dhan ah uu sameeyay darteed, dano iska soo horjeeda, iyo inuu falismo ama uu kaco dhaqaale ahaan(uu bayhooyo). Xubin ka tirsan guddiga waxaa uu xaq u leeyahay in si sharci ah dib loogu eego xil ka qaadida lagu sameeyay/ama racfaan. Xubin ka tirsan Guddiga xaq uma lahan inuu helo mushaar ama gunno in qodob kusaabsan xaq u lahaanshiyehiisa mushaar ama gunno la sameeyay maahee, si Xeerka waafaqsan. Qarashaad la siiyay xubnaha Guddiga si ay uga qeyb galaan shirar looma qaadanayo inay yihiin mushaar.</p> <p>Tusaaleyaal waxaa ah Guddiyada Xafiiska ururada aan dawliga ahayn eeg dhammaadka dukumiintigaan.</p>
--	---

Qodobka 7aad: Soo magacaabidda iyo Shaqooyinka Diiwaangaliyayaasha Dawlad Goboleedyada

Fikradaha ururada aan dawliga ahayn	Waxyaabaha ay soo jeediyeen ururada aan dawliga ahayn
<p>Tilmaamayaasha ACHPR waxay qeexayaan in “Habrac kan la mid ah oo diiwaangalined laga isticmaalo dhammaan qeybaha uu dalku ka kooban yahay.” (qod. 19)</p> <p>Qeybtaan Xeerka ka tirsan waxay abuureysaa heer kale oo urur kormeer ah kaasi oo loogu talagalay ururada aan dawliga ahayn, kaasi oo ah heer dawlad goboleed, kaasi oo qabta isla shaqooyinka Xafiiska Xiriirinta Hawlaha ururada aan dawliga</p>	<p>Diiwaangalinta waa in la baahiyo maadaama taasi faaiido iyo arin fudud u tahay ururada yaryar ee un ka shaqeeya heer goboleed oo qura. Xafiiska Xiriirinta Hawlaha ururada aan dawliga ahayn, oo Guddiga ururada aan dawliga ahayn uu xukumdo, waa inuu noqdaa hay’ada soo magacaabeysa dhammaan shaqaalaha diiwaangalinta samaynaya waana inuu ka hirgaliyo xafiisyo heer federal iyo heer dawlad goboleedyo taasi oo loogu talo galay waxkuoolnimada shaqo ee</p>

<p>ahayn kuwo la mid ah. Tani waxay ka dhigeysaa habraacyada diiwaangalinta kuwo leh culeysyo aan loo baahneyn, waxay abuurtaa sidii ay kuimaan lahaayeen xulashooyin badan iyo jahwareer ku saabsan sharuudaha, kuwaasi oo liddi ku noqda ururada aan dawliga ahayn – gaar ahaan ururada aan dawliga ahayn ee yaryar ee ka dhex shaqeeya gobolada oo qura– kanina dhaqan wanaagsan ma ahan. Sidaa darteed, si loo xaqiijiyo in si isku mid ah loo dabaqo Xeerka, Xafiiska Xiriirinta Hawlaha ururada aan dawliga ahayn oo Guddiga ururada aan dawliga ahayn uu xukumo, waa inuu qabto dhammaan shaqooyinka uuna xiriiriyo dhammaan madaxda diiwaangalinta ee heer federal iyo heer dawlad goboleedyo ee katirsan qaab-dhismeedkiisa. Tani waxay xaqiijin doontaa in Xafiiska Xiriirinta Hawlaha ururada aan dawliga ahayn, oo Guddiga ururada aan dawliga ahayn uu xukumo, uu awood u yeesho inuu u shaqeeyo si madax bannaan .Taa baddalkeedii, soo magacaabidda waxaa samayn kara Xafiiska Xiriirinta Hawlaha ururada aan dawliga ahayn oo Guddiga ururada aan dawliga ahayn uu xukumo asagoo kaashanaya xafiiska ku habboon ee heerka Dawlada Federaalka ah ama waxaa uu kaashan karaa madaxda dhanka farsamo ee leh khibrada munaasabka ah ee lagu fududeynayo hawlaha loo igmaday Xafiiska.</p>	<p>hawlahiisa kucad Qodobkaan. Soo magacaabidda ayaa la samayn karaa ayadoo la kaashanayo dawladaha xubnaha ka ah federaalka, laakiin madaxda ayaa waxaa dusha kala socon doona Xafiiska Xiriirinta Hawlaha ururada aan dawliga ahayn, oo Guddiga ururada aan dawliga ahayn uu xukumo.</p>
---	--

Qodobka 8aad: Soo magacaabidda iyo Shaqooyinka Xafiiska Xiriirinta Hawlaha ururada aan dawliga ahayn

Fikradaha ururada aan dawliga ahayn	Waxyaabaha ay soo jeediyeen ururada aan dawliga ahayn
Guud ahaan, shaqooyinka qaarkood aad ayay u ballaaran yihiin waxaana ay dammaanad qaadayaan garasho aad u ballaaran oo	8.5. ka saar hannaanka warqadaha ogolaanshaha ka horeeya 8.7. waa in wax laga baddalo ayadoo la qeexayo ereyga ‘QOD’

<p>abuuri doonta xaddidaadyo aan loo baahnayn waxayna cabburineysaa xorriyada isku xirnaanta dadka:</p> <p>8.5. Hadii dhammaan habraacyada diiwaangalinta uu maamulo hal urur maamul oo qura - Xafiiska Xiriirinta Hawlaha ururada aan dawliga ahayn, oo uu xukumo Guddiga ururada aan dawliga ahayn, tani waxay xaqiijin doontaa in diiwaangalintu noqoto mid fudud oo aysan ahayn mid culus, marka looma baahanayo warqado ka horeeya ogolaanshaha¹.</p> <p>8.7 ma cadda waana in wax laga baddalo ayadoo la qeexayo erayga 'QOD' 8.8 ka sharci guud ahaan hoos imaanaya Xeerka caalamiga ah, sharcigu waa inuu ka joogsadaa inuu dhigo xaddidaadyo dhul kusaabsan oo liddi ku ah hawlaha ururada. Ururada aan dawliga ahayn waa in loo ogolaado in si madax bannaan ay qiimeyn ugu sameeyaan oo u xushaan meelo ay tahay in cawimaad la geeyo, sida ku cad mabaadiida baniadaminimo, ogolaanshiyaha ururada iyo heshiisyada maal-gelinta.</p> <p>8.9 iyo 8.10 waxay u awood siinayaa Xafiiska Xiriirinta Hawlaha ururada aan dawliga ahayn, oo Guddiga ururada aan dawliga ahayn uu xukumo, awood dib loogu eegayo oo jawaabcelin looga bixinayo warbixinada sanadlaha ah ee ururada aan dawliga ahayn, taasi oo macnaheedu yahay heer dheeraad ah waxoogaa oo ah ogolaansho waxayna abuurtaa fursado loogu talagalay dhexdhexaadin lagu sameeyo hawlaha ururada.</p>	<p>8.8. waa in meesha laga saaro</p> <p>8.9. iyo 8.10. waa in wax laga baddalo si loogu baahdo helidda warbixinada sanadlaha ah oo qura kuwaasi oo loogu talo galay qorsheha xogta</p> <p>8.11. Waa in meesha laga saaro si loo ogolaado diiwaangalinta inuu sameeyo Xafiiska Xiriirinta Hawlaha ururada aan dawliga ahayn, oo Guddiga ururada aan dawliga ahayn uu xukumo</p> <p>8.12. diiwaanka waxaa gebi ahaantii maamulaya Xafiiska Xiriirinta Hawlaha ururada aan dawliga ahayn, oo Guddiga ururada aan dawliga ahayn uu xukumo</p> <p>8.13, 8.15, 8.16 oo loogu talo galay Guddiga xafiiska ururada aan dawliga ahayn inuu maamulo</p> <p>Intaas waxaa dheer, awooda lagu diidayo codsiyo waa in la qeexo ayadoo si cad loo dajinaayo sababaha lagu cudur daaran karo ee sidaa loo yeelay, kuwaasi oo ay tahay in lagu saleeyo waafaqid la'aan aan la waafaqin sharuudihii la dajiyay, ama jiritaanka magacyo ama ujeedyooyin aan la aqbali karin. Sababaha lagu diidayo codsiyo waa inaan lagu dhaafin Xeer-nidaamiyeyaasha sida lagu macneeyay qod. 33 laakiin xeer-nidaamiyeyaashu waa inay si fudud u macneeyaan habraaca</p>
---	--

¹ Tusaale – Qodobka NPO ee South Africa, qeybta 12aad iyo 13aad: Isdiiwaangalintu waa iskaa, looma baahna ogolaansho marka hore. Isdiiwaangalinta, waxaa un loo baahan yahay in la buuxiyo foom gaar ah iyo in la xareeyo dastuur/ama dukumiintiga muujinaya in ururka la sameeyay. Wareegtadii Morocco ee 1-58-376 ee kusaabsanayd xaqa Hirgalinta Ururada, Qod. 2 – Ururada waxaa loo hirgalin karaa si xor ah ayadoon la heysan ogolaansho marka hore [laakiin waxaa shardi ah in lasoo ogeysiyo dawlada jiritaankooda].

<p>8.11 waxaa uu abuuraa culeys maamul oo aan loo baahneyn oo ah dhanka hannaanka diiwaangalinta.</p> <p>8.12, 8.13, 8.15, 8.16 waxaa aan loo baahnayn in la kala sooco shaqooyinka u dhexeeya Diiwaangaliye Guud iyo Xafiiska Xiriirinta Hawlaha ururada aan dawliga ahayn.</p>	
--	--

Qodobka 9aad: Diiwaangalinta Ururada Aan Dawliga Ahayn

Fikradaha ururada aan dawliga ahayn	Waxyaabaha ay soo jeediyeen ururada aan dawliga ahayn
<p>Shardiga ah in dhammaan ururada aan dawliga ahayn ay isdiiwaan gashaan waxaa uu horjoogsadaa xorriyada isku xirnaanta dadka. Badanaa ururada aan rasmiga laga dhigin, dhaqdhaqaaqyada, ama ururada bulshada ayaa waxaa loo hirgaliyaa qorshaha ah isku duwidda arimaha bulshada, heer gobol ama xataa heer qaran waana inaysan u baahan diiwaangalin rasmi ah oo dawladeed si ay hawlhooda u qabtaan. Diiwaangalin qasab ah waa xaddidaad aan caddaalad ahayn oo ka dhan ah xaqa loo leeyahay xorriyada isku xirnaanta dadka marka loo eego Heshiiska Caalamiga ah ee Xaquuqd Madaniga ah iyo tan Siyaasadeed (ICCPR), iyo Heshiiska Afrika ee Xaquuqda Baniadmiga iyo Dadyowga (ACHPR).</p>	<p>Isdiiwaan galintu waa inay ahaato iskaa, hannaankana waa inuu maamulo gabi ahaan Xafiiska Xiriirinta Hawlaha ururada aan dawliga ahayn, oo Guddiga ururada aan dawliga ahayn uu xukum². Ka saara meesha oraahda ah 'loogu talagalay tixgalin hore oo diiwaangalined'. Waa inaan loo baahan ansixin marka hore ah. Wixii aan ka ahayn ujeedooyinka iyo magaca ururka, qoraalka dukumiintiga loosoo gudbiyay hay'adaha dawlada si diiwaan galin loo sameeyo waa inaan qasab laga dhigin in dib u eegid lagu sameeyo. Kaliya awooda ururku uu ku waafaqayo sharuudaha rasmiga ah waa inay munaasab u ahaataa qorsheyaasha diiwaangalinta.</p>

² Siyaasada Kaqeybgalka ee Ururada Namibia ee Rayidka: Waxay dhiirgalisaa isdiiwaangalin iskaa ah; hannaanka in wax laga dhigo shirkad madax bannaan waxaa uu u baahan yahay warqada rasmiga ah ee hannaanka diiwaangalinta.

Qodobka 10aad: Heerarka Diiwaangelinta

Fikradaha ururada aan dawliga ahayn	Waxyaabaha ay soo jeediyeen ururada aan dawliga ahayn
<p>Diiwaangalintu waa inay ahaataa mid fudud oo degdeg ah– qeybta Xeerka ee la xiriirta habraaca laakiin ka gaabisa inay sharraxaad ka bixiso habraaca gaarka ah ee loogu talagalay buuxinta codsiyada heer Dal iyo heer Gobol – qodobadaa waa kuwo aan waadax ahayn sida sare lagu soo xusay.</p> <p>Hannaanka diiwaangalinta ee heer dal waxaa uu u baahan yahay in la caddeeyo.</p>	<p>Diiwaangalin iyo maamulida ururada aan dawliga ahayn waa inay isku mid ahaadaan ayadoon loo eegeyn goobta diiwaangalinta waana in la adkeeyo oo uu sidaa sameeyo hal urur oo maamul. Kani waa inuu ahaado Xafiiska Xiriirinta Hawlaha ururada aan dawliga ahayn, oo Guddiga ururada aan dawliga ahayn uu xukummo, sida sare lagu soo go'aamiyay³.</p>

Qodobka 11aad: Codsiga Diiwaangalinta

Fikradaha ururada aan dawliga ahayn	Waxyaabaha ay soo jeediyeen ururada aan dawliga ahayn
<p>Sharuudaha diiwaangalintu waa inay ahaadaan kuwo aad u kooban, munaasab ah oo aan culeys lahayn. Tilmaameyaasha ACHPR waxay u baahan yihiin oo qura xog muhiim ah oo aasaasi ah oo ka dhigan qorsheha ogeysiinta. Sharuudaha waxaa kujira ururka magaciisa, magacyada xubnaha aasaasay, cinwaanka tooska ah ee meesha uu xafiiska ururku ku yaalo (hadiiba uu jiro), xogta ku saabsan xiriirka meesha lagala soo xiriirayo ururka, iyo ujeedooyinka la qorsheeyay iyo hawlaha ururka (Qod. 14)</p> <p>Foomka gaarka ah ee hoos imaanaya qod. 11.1.a iyo 11.1.b waa inuu ku filnaado inuu bixiyo xog kusaabsan ururka. Sharuudaha dheeraadka ah ee loogu talagalay ururada aan dawliga ahayn waa kuwo aan waadax ahayn oo aan caddaalad ahayn.</p>	<p>11.1.c, d iyo e waa in meesha laga saaro</p> <p>11.2. Ha la saaro</p> <p>11.3. Ha la saaro</p> <p>11.6.Haloo saaro si waafaqsan talabixinada sare</p> <p>11.7. Haloo saaro si waafaqsan talabixinada sare</p>

³ Kenya, Guddiga Xiriirinta ururada aan dawliga ahayn ayaa ah bartamaha diiwaangaliya dhammaan ururada aan dawliga ahayn. Itoobiya, ururada aan dawliga ahayn waxaa diiwaangalisa Hay'ada Ururka Bulshooyinka Rayidka ah oo ah xarunta dhexe.

Qodobka 12aad: Sida ay u shaqeyneyso Diiwaangelinta

Fikradaha ururada aan dawliga ahayn	Waxyaabaha ay soo jeediyeen ururada aan dawliga ahayn
<p>Diiwaan galin ku kooban labo sano waa xadidaad aan loo bahnayn waxayna culays aan loo bahnayn ku keenaysaa ururada aan dawlida ahayn iyo dowladdaba .</p> <p>Qodobka 17 ee Tilmaamayaasha Guddiga Afrika ee Xaquuqda Bani'aadmiga iyo Dadyowga ee kusaabsan xorriyada isku xirnaanta dadka iyo tan isu soo uruuridda dadka gudaha Afrika wuxuu go'aaminayaa diiwaangalin hal mar ah.</p>	<p>Mudada ay shaqeyneyso waa in la kordhiyo diiwaangalintuna waa inay ahaato hal mar kaliya, taasi oo aan u baahnayn in ururada aan dawliga ahayn ay is diiwaan galiyaan in sannad kasta ama inay soo cusbooneysiyaan isdiiwaangalintooda.</p>

Qodobka 13aad: Warqada Isfahamka

Fikradaha ururada aan dawliga ahayn	Waxyaabaha ay soo jeediyeen ururada aan dawliga ahayn
<p>Qodobkaan waa mid aan caddeyn waadaxna ma ahan marka Warqad Isfaham loo baahan yahay. Ururadu waa inay lahaadaan awood ay kusameeyaan wixii ay doonaan markii ay la tacaamulayaan shiriigyada sidaa daraadeedna waa in si waadax ah loo caddeeyo in Warqada Isfahamku tahay mid xulasho kusalaysan oo hadii la doonana lala imaan karo hadii kalena laiska deyn karo.</p>	<p>Warqadaha Isfahamka waa inaan wax lagu boorrin (lagu qasbin) gaar ahaan marka hayadaha aan dawliga ahayn ay si toos ah ula shaqeynayaan Wasaaradaha, laakiin waa inay ahaadaan arin iskaa ah oo u dhexeysa urur aan dawli ahayn kii uu doono ha ahaado iyo waax dawladeed tii ay doontaba ha ahaatee.</p>

Qodobka 14aad: Mamnuuc

Fikradaha ururada aan dawliga ahayn	Waxyaabaha ay soo jeediyeen ururada aan dawliga ahayn
<p>Guud ahaan, dhammaan mamnuucyadu aad ayay u ballaaran yihiin waxaana ay keenayaan fursad si ka duwan sidii loogu talo galay loogu isticmaalo; sidoo kale ma caddeeyaan sida ururada aan dawliga ahayn ay tahay inay u xaddidaan habdhaqankooda ay wax ku waafaqayaan. Qodobadaasi waa xaddidaadyo aan la baahneyn oo carqaladeeyn kara qorsheha ururada.</p> <p>Qodobkaan wuxuu caqabado ku keenaa ururada aan dawliga ahayn ee doonaya inay bixiyaan gargaar baniaadaminimo ama mid horumarineed sida waafaqsan mabadiida baniaadaminimo. La'aanta qaab shaqo oo sharci ah waxay keeni kartaa si khaldan u adeegsi, siyaasadeynta hawlaha ururada aan dawliga ahayn ama in si aan loo aaba yeelin hawlaha loogu diido. Waxay halis ugu jiraan daahinta cawimaada dadka rayidka ah ee kusugan deegaano gaar ah ay baahida u qabaan, sida shaqo kusaabsan maamulka iyo waxbarashada arimaha bulshada. Ururada baniaadaminimo gaar ahaan waxaa looga baahan yahay inay bixiyaan cawimaad loogu talagalay dadka rayidka ah taasi oo ku salaysan baahi oo qura. Halbeegyo caynkaan ah waxaa ay dembi ka dhigi karaan hawlaha (iyo shaqaalaha) bixiya gargaarka hayadaha dawliga ah ay u arkaan inay liddi ku yihiin ujeedooyinka siyaasadeed.</p>	<p>Meesha ha laga saaro Qodobka 14aad gebi ahaantii oo halagu soo daro hal qodob oo caddeynaya in ururada aan dawliga ahayn ay qaban karaan wixii hawlo ah oo Xeerka waafaqsan.</p>

Qodobka 15aad: Diidmada Diiwaangalinta

Fikradaha ururada aan dawliga ahayn	Waxyaabaha ay soo jeediyeen ururada aan dawliga ahayn
15.4 si aan dheelitirnayn ayaa uu wax u xaddidayaa waxaana uu	Is waafajiya qodobka si loogu soo daro racfaan loo qaato maxkamad

<p>ku tumanayaa xaqa loo leeyahay in la raadiyo sidii xaqaas loo soo celin lahaa oo dib loogu siin lahaa ururada – waxaa uu sidoo kale ka hor imaanayaa qodobka 25aad oo tilmaamaya hannaan racfaan oo sidii hore ka sharraxaad badan ama ka faahfaahsan kaasi oo ah mid maamul iyo mid sharci labadaba. Waxaan caddeyn sababta qodobkaan uu ugu kooban yahay ururada aan dawliga ahayn ee caalamiga ah oo qura maadaama arintaasi aysan la jaanqaadeyn mabda'a kala takoorid la'aanta. In si ka duwan ururada kale loola tacaamulo urur kujira hannaanka diiwaangalinta waa inay lahaataa cudurdaar macquul ah oo ujeedkiisu wanaagsan cad yahay.</p>	<p>madax bannaan oo aan dhanna u janjeerin si go'aano ay uga gaarto diidmada codsiyada. Sidaasi daraadeed, go'aanka wasiirka waa inaan loo qeexin sidii inuu yahay kamadambays laakiin loo adeegsanayo racfaan garsoor sida waafaqsan qodobka 25aad ee Qodobka ururada aan dawliga ahayn.</p>
--	---

Qodobka 16aad: Dib u Cusbooneysiinta Diiwaangalinta

<p>Fikradaha ururada aan dawliga ahayn</p>	<p>Waxyaabaha ay soo jeediyeen ururada aan dawliga ahayn</p>
<p>Qodobka 16aad waxaa uu u baahan yahay in dib u eegid lagu sameeyo looguna sameeyo si waafaqsan talabixinta ah in diiwaangalintu ahaato mid socota oo aan ku dhacayn wakhti xadidan.</p>	<p>Qodobkaan meesha ka saara (eeg kor).</p>

Qodobka 17aad: Warbixinada Sanadlaha ah

<p>Fikradaha ururada aan dawliga ahayn</p>	<p>Waxyaabaha ay soo jeediyeen ururada aan dawliga ahayn</p>
<p>Sharuudaha soo tebinta warbixinta waa inay ahaadaan kuwo fudud, waana inay munaasab ku noqdaan inta uu ururku le'eg yahay iyo tirada hawlihiisa ama baaxada hawlaha uu qabto. Faahfaahinada warbixinada waa in si yar loo jaangooyo si loo xaqiijiyo in la helo dheelitir u dhexeeya xog muhiim ah oo isu</p>	<p>17.3. Meesha halaga saaro 17.4. Meesha halaga saaro</p>

<p>dhiganta si loo xaqiijiyo wanaag dhanka maaliyadda ah iyo xushmad loo hayo khusuusiyaadka ururka.</p> <p>Warbixinada sanadlaha ah waa inay ku eg yihiin xogta lagama maarmaanka ah ee loo sheego dadweynaha ee ku saabsan hawlaha ururka, sidaas daraadeedna qorsheyaasha shaqo, iyo islaxisaabtanada miisaaniyadeed ee faahfaahsan waa in laga reebo maadaama ururadu aysan dawlada ka helin dhaqaale taasi oo keeni lahayd in qasab ay noqoto in sidaasi loo baaro.</p> <p>Ururada waa inaan lagu qasbin inay la xiriiryaan ujeedooyinkooda iyo hawlahooda siyaasada dawlada maadaama taasi ka dhigan tahay xaddidaad aan caddaalad ahayn oo liddi ku ah xorriyada isku xirnaanta dadka. Waxaa ku filan in urur hawlihiisu ay waafaqsan yihiin ujeedooyinkiisa iyo ahdaaftiisa si waafaqsan dastuurka aysana ahayn kuwo geyru sharci ah. Xog shakhsi sida liiska shaqaalaha iyo hantida waa in laga reebo warbixinta.</p>	
--	--

Qodobka 18aad: Isbaddalada Madaxda Xafiisyada, Dastuurka, iyo Magacyada

Fikradaha ururada aan dawliga ahayn	Waxyaabaha ay soo jeediyeen ururada aan dawliga ahayn
Shardiga ah in dib la isu diiwaan galiyo maahan dhaqan wanaagsan waxaana uu u keenaa culeys aan caddaalad ahayn ururada.	Kasaara shardiga ah in dib laisu diiwaan galiyo. Ururada aan dawliga ahayn waa in lagu dhiirgaliyo inay ku wargaliyaan Xafiiska Xiriirinta Hawlaha ururada aan dawliga ahayn, ee Guddiga ururada aan dawliga ahayn uu xukumo, wixii isbaddal ah ee yimaada ⁴ .

⁴ Tusaale wanaagsan oo loo baahan yahay in la arko waa Qodobka NPO ee South Africa kaasi oo dhigaya sida soo socota: (Qeybta 19): Badalidda dastuur ama magaca urur aan faaiido doon ahayn oo diiwaangashan

(1) Urur aan faaiido doon ahayn oo diiwaan gashan waa uu baddali karaa dastuurkiisa iyo magaciisa.

Qodobka 19aad: Dib ula noqoshada Diiwaangalinta

Fikradaha ururada aan dawliga ahayn	Waxyaabaha ay soo jeediyeen ururada aan dawliga ahayn
<p>La xisaabtamidda ururada aan dawliga ahayn waa in lagu maareeyo soo tebinta warbixinada sanadlaha ah, Xafiiska Xiriirinta Hawlaha ururada aan dawliga ahayn, ee Guddiga ururada aan dawliga ahayn uu xukumo, iyo nidaamka garsoorka.</p>	<p>Dib ula noqoshadda diiwaan galinta waa in kaliya ay samayso maxkamad sharci ah, kadib markii la maro hannaan sharci ah balse urur maamul waa inuusan hawshaasi galin. Ururka arinku uu saameeyay waa inuu xaq u lahaado in la dhageysto dacwadiisa ka hor inta aan wax go'aan ah la qaadan. Xiridda ururka waa in un uu sameeyo ururka aan dawliga ahayn marka loo eego dastuurka, ama maxkamadi waa inay sidaasi yeesho. Aasaaseyaasha urur aan dawli ahayn, agaasimeyaasha iyo maareeyayaasha hadiiba ay ku kacaan waxaa kusoo heli karta dayacaad inay sameeyeen oo qabsan karta maxkamad sharci ah baddalkii Xafiiska Xiriirinta Hawlaha ururada aan dawliga ahayn.</p>

Qodobka 20aad: Xiridda Ururka Si Iskii ah, Soo Gabagabeynta Hawlihiisii

- (2) Urur aan faaiido doon ahayn oo diiwaan gashan kaasi oo go'aansaday inuu baddalo dastuurkiisa ama magaciisa waa inuu usoo diro agaasimaha— (a) nuqul ka mid ah go'aanka ama baaqa iyo shahaado uu saxiixay madaxa xafiiska oo caddeynaya in baaqu uu waafaqsan yahay dastuurka ururka iyo dhammaan sharuucda waafaqsan ee munaasabka ah; iyo (b) hadii ururku go'aansaday inuu baddalo magaca, orjinaalka shahaadada markaas ee diiwaangalinta.
- (3) Markii laga helo dukumiintiyada ku cad qeyb-hoosaadka (2), urur go'aansaday inuu baddalo dastuurkiisa, agaasimehu waa inuu— (a) diiwaan galiyaa dastuurka la baddalay ama cusub hadii uu waafaqo sharuudaha diiwaan galinta; (b) uu ansixyo nuqulka baaqa, asagoo caddeynaya in isbaddalka ama baddalaadda dastuurka la diiwaan galiyay; iyo (c) inuu u diro nuqul ah baaqa la ansixiyay ururka.
- (4) Markii laga helo dukumiintiyada ku cad qeyb-hoosaadka (2) ururka go'aanka ku gaaray inuu baddalo magaciisa, agaasimehu waa in— (a) uu ku qoro magaca cusub diiwaanka uuna soo saaro shahaadada ururka oo uu ku qoran yahay magaca cusub ee ururka; (b) uu ka saaro magacii hore diiwaanka uuna kansal gareeyo shahaadadii hore ee diiwaangalinta; iyo (c) inuu u diro shahaadada cusub ururka

Qodobka 21aad: Maaliyada iyo Canshuuraha

Fikradaha ururada aan dawliga ahayn	Waxyaabaha ay soo jeediyeen ururada aan dawliga ahayn
<p>Qarashka diiwaangalinta waa in si cad loogu xuso Xeerka halkii uu ahaan lahaa mid aan waadax ahayn sida hada lagu xusay 21.4 ilaa 21.6 iyo lifaaqa saddexaad, heer gaar ah oo qarashka loogu talagalay waa in la hirgaliyo kaasi oo xisaabta kudara awooda ururada kala duwan iyo ujeedka lagu dhiirigalinaayo samayn sharci ah.</p> <p>Tixraaca lagu aqbalaayo barnaamijyada kujira 21.7 si hufan looma qeexin, meel munaasab ah lama dhigin waxayna u baahan yihiin qeexid intaa ka sii weyn, ayadoo lagu xisaabtamayo baahida loo qabo in ururada aan dawliga ahayn ay usii madax bannaanaadaan nooca iyo goobta adeegyada.</p>	<p>Sii heer waadax ah oo gaar ah oo loogu talagalay qeexidda qarashka diiwaangalinta. Qeex qarashka. Qarashka diiwaangalintu waa inuu meesha ku daro awooda ururada kala duwan iyo ujeedka lagu dhiirigalinaayo samayn sharci ah.</p> <p>21.7 waa in meesha laga saaro</p> <p>Waxaa dheer qodobkaan, siinta adeegyada iyo badeecooyinka urur aan dawli ahayn waa in aan la dul saarin oo laga mamnuuco canshuurta dulsaarka ah [VAT]. Soo dejinta badeecooyinka urur aan dawli ahayn uu isticmaalayo markii uu qabanayo hawlihiisa waa in aan la saarin canshuurta la saaro alaabta wadanka soo galeysa.</p>

Qodobka 22aad: Diiwaanka Ururada Aan Dawliga Ahayn

Fikradaha ururada aan dawliga ahayn	Waxyaabaha ay soo jeediyeen ururada aan dawliga ahayn
<p>Sidii horayba loogu soo xusay, shaqooyinkaan waa in loo daayo Xafiiska Xiriirinta Hawlaha ururada aan dawliga ahayn, oo Guddiga ururada aan dawliga ahayn uu xukumo, waana in Diiwaangaliyaha Guud gebi ahaanba meesha laga saaro. Intaas waxaa dheer, Diiwaanka dadweynaha oo dhami arki karaan waa inay ku jiraan xog xisaabaad ah oo ku saabsan inta codsiyo la aqbalay iyo inta la diiday – si loo xaqiijiyo isla xisaabtan dadweyne.</p>	<p>Meesha halaga saaro shaqada Diiwaangaliyaha Guud ee qodobkaan kujirta.</p> <p>Diiwaanka la wada arki karo waa inay kujiraan xog xisaabaad ah oo ku saabsan inta codsiyo la aqbalay iyo inta la diiday</p>

Qodobka 23aad: Baaritaano

Fikradaha ururada aan dawliga ahayn	Waxyaabaha ay soo jeediyeen ururada aan dawliga ahayn
<p>Wakiilka gaarka ah ee Qaramadda midoobey u qaabilsan soo tebinta arimaha xaquuqda in si nabad ah loo kulmo la isuguna xirmo, waxaa uu garawsaday awooda urur madaxa banaani uu ku baari karo xogta ururada taasi oo looga dan leeyahay in lagu xaqiijinayo daah furnaanta iyo isla xisaabtanka, laakiin habraac caynkaas ah waa inuusan noqon fikrad aan sabab ku salaysneyn waana qasab inuu qaddariyo mabda'a wax kala takoorid la'aanta iyo xaqa loo leeyahay khusuusiyaadka maadaama taasi hadii kale ay galinayso halis madaxbannaanida isku xirmidda dadka iyo badbaadada xubnahooda.⁵</p> <p>Ma cadda waxa looga jeedo "Hawl aan munaasib ahayn" sida ku xusan qodobka 23.3. Tani waxay keenaysaa in si khaldan loo isticmaalo markii loo baahdo. Waanay adag tahay in ururadu ay sii sadaaliyaan ama ay dabaqaan madama oo aan ujeedka qodobkani cadayn</p>	<p>Ku dar halkaas qodob loogu talagalay amar garsoor kahor intaan lasoo saarin ogeysiis baaritaan lagu sameynayo iyo xaqa ururka aan dawliga ahayn uu u leeyahay in la dhagaysto ka hor intaan lasoo saarin go'aan baaritaan.</p> <p>Kusoo dar xaqa loo leeyahay daweyn garsoor markii uu dhaco baaritaan aan caddaalad ahayn ama xadgudubyo ay dhacaan inta baaritaano ay socdaan.</p>

Qodobka 24aad: Dembiyada iyo Ciqaabaha

Fikradaha ururada aan dawliga ahayn	Waxyaabaha ay soo jeediyeen ururada aan dawliga ahayn
<p>Ganaaxyada dembiilenimo waa xaddidaado aan la aqbali kareyn oo ku saabsan xorriyada isku xirmidda dadka, oo sida Guddiga Afrika uu caddeeyay, Dawladuhu waa inaysan soo rogin Ganaax dembiilenimo ayadoo la cuskanayo sharuucda xukumaya ururada</p>	<p>Meesha ha laga saaro 24.5 (c) oo (d); (e) iyo (f) waa in loo dabbaqo si waafaqsan racfaan garsoor.</p> <p>Xukminta dacwadaha waa in si waadax ah loo xaqiijiyo. Qod. 24.6 waa mid aan aad waadax u ahayn marka loo eego waxa noqda 'dembi</p>

⁵ [A/HRC/20/27, 21 Mey 2012, baragaraaf 65]

<p>aan faaiido doonka ahayn laakiin waa inay ku qoraan cunaqabateynadaas xeerka ciqaabta gudahiisa. [qod. 55, Tilmaamayaasha ACHPR]⁶</p> <p>Awoodaha la siiyay Xafiiska Xiriirinta Hawlaha ururada aan dawliga ahayn, ee Guddiga ururada aan dawliga ahayn uu xukumo, si uu usoo rogo ganaaxyo iyo xarig waa kuwo xad dhaaf ku ah urur maamul waxayna taasi faragalin kusamaysaa ogolaanshaha dastuurka ee madaxa bannaan ee maxkamadaha maadaama ay yihiin hayada aasaasiga ah ee mas’uulka ka ah inay goyso garta dacwadaha si waafaqsan mabaadiida maxkamadayn xaq ah. Intaas waxaa dheer, qodobka 24.5 (d) waa mid aan waadax ahayn, marka dhammaan ciqaabaha oo idil waa in loogu caddeeyo gudaha Xeerka si waadax ah ayadoo aysan jirin qeybo xulasho ku salaysan oo ama laga tagi karo ama la qaadan karo.</p>	<p>gaarsiisan heer aad u sarreeya.’ Qodobku waa inuu dejiyo heer cad iyo kaabi loogu talagalay dembiyada ay la tacaamulayaan heerar kale oo garsoor.</p>
--	--

Qodobka 25aad: Racfaanada

<p>Fikradaha ururada aan dawliga ahayn</p>	<p>Waxyaabaha ay soo jeediyeen ururada aan dawliga ahayn</p>
<p>Qodobku waxaa uu muujinayaa inta wax oo iska hor imaanaya marka laga hadlaayo hannaanada racfaanka asagoo qodobku uu caddeynayo in racfaanada ku socda Wasiirka ay yihiin kama dambeys ayna tahay in la adeeco (qod. 15.4 iyo 25.3), asagoo waliba sidoo kale bixinaaya xulasho loogu talo galay racfaan garsoor.</p>	<p>Ha la iswaafajiyo dhammaan qodobada kusaabsan racfaanada si meesha looga saaro oraahda sida ‘kama dambeys’ iyo in ‘ayna tahay in la adeeco’ laakiin in loo adeegsado dhammaan go’aanada racfaan garsoor ka awooda ugu dambeysa ahaan.</p>

Qodobka 26aad: Arimaha Shaqada

⁶ Eeg Ururka Afrikaanka Malawi iyo kuwo kale iyo. Mauritania, Comm. Nambaro 54/91, 61/91, 98/93, 164-196/97 & 210/98 (2000), baragaraafyada. 106-7.

Qodobka 27aad: Hantida

Fikradaha ururada aan dawliga ahayn	Waxyaabaha ay soo jeediyeen ururada aan dawliga ahayn
<p>qodobkaan waa la garwaaqsaday si loo xaqiijiyo in hantida muhiimka ah ee loo meel dhigay in lagu taageero dadka Soomaaliyeed ay sidaa kusii socoto, Balse, waxaa suurto gal ah in ay caqabado ku keento qaar ka tirsan ururada kuwaasi oo liddi ku ah sidii ay ugu dabaqi lahaayeen siyaasada gudaha iyo sharuudaha lagu xusay heshiisyada deeqbixiyeyaasha .</p> <p>Hadii arimaahsi yimadaan waa in tixraac lagu sameeyo heshiiska lala gaadhay deeqbixiyaha ee loogu talagalay maamulidda hantida. Arintaan waxay ka horimaanaysaa heeshiiska deeqda ee iminka jira ee badi hadiiba aysan gidi ahayn deeqbixiyeyaashu ay isku raaceen. Deeqbixiyeyaashu waa in ay u dhowrsanaato go'aanka laga yeeayo meesha la geynayo hantida mashruucu markii uu dhammaado kadib. Ururka aan dawliga ahayn ee caalamiga ah in la siiyo xulasho uu go'aan uga gaaro bal inuu ku wareejinayo dhammaan qarashkii soo horay iyo qalabka urur aan dawli ahayn oo qaran oo qabta hawlo la mid ah kuwii uu qaban</p>	<p>Wax ha laga baddalo qodobkaan si uu ugu qornaado sidaan: Markii la joojiyo waqtigii urur aan dawli ahayn oo caalami ah uu kujoogi lahaa/ama uga shaqeyn lahaa Dalka, dhammaan qarashka soo hara iyo qalabka waa in lagu wareejiyo urur aan dawli ahayn oo qaran oo shariig la ah ama Wasaarad ama Machad shariig la ah oo lagu magacaabay heshiiskii orjinaalka ama asalka ahaa taasi oo loogu talagalay sii wadidda shaqada/ama qorshaha. Wixii urur aan dawli ahayn ah ama deeqbixiye doonaya in laga dhaafto xeer-nidaamiyahaan ama Xeerkaa waa inuu usoo gudbiyo codsi qoraal ah Xafiiska Xiriirinta Hawlaha ururada aan dawliga ahayn oo bixinaya sabab caddaalad ah oo loogu talagalay in meesha looga saaro ama lagu sii haysto hanti gaar ah⁷.</p>

⁷ Rwanda, urur aan dawli ahayn oo caalami ah waxaa uu xor u yahay inuu qalabkiisa ku wareejiyo urur aan dawli ahayn oo qaran oo diiwaan gashan oo qabta hawlo la mid ah kuwii uu qabanaayay taasi oo ah deeq ahaan. Si kastaba ha ahaatee, hadii urur aan dawli ahayn oo caalami ah uu tilmaamo sabab waadax ah oo ah in si dhab ah uu ugu baahan yahay qalabkaas waa uu heysanayaa. Uganda – sharcigu waxaa uu doonayaa in dastuurka urur walba uu hirgaliyo habraacyo loogu talagalay ka qaadida ururka hantidiisii kadib markii la xiro (Qodobka ururada aan dawliga ahayn Qeybta 49(1)). Habraac ahaan, ururada sameeyay baaq loogu talagalay xiridtaanka hawlhooda si iskood ah waxaa qasab ah inay sameeyaan oo usoo gudbiyaan Waaxda ururada aan dawliga ahayn iyo qofka sharcigu ugu xilsaaray arinkaas si rasmi ah caddeyn kusaabsan arimhooda taasi oo muujinaysa faahfaahinta hantidooda, qaamaha, magacyada, meesha ay daggan yihiin, iyo shaqooyinka deymiyeyaasha iyo dammaanadaha ay haystaan (deymiyeyaashu) (Qodobka ururada aan dawliga ahayn Qeybta 49(6)). Kenya, Qodobka ururada aan dawliga ahayn ma ogolaado markii la joojiyo hawlihiisa oo lasoo xiro, urur aan dawli ahayn oo caalami ah inuu bixiyo qarashka usoo hara, iyo qalabka iyo alaabada. Dastuurada ururada aan dawliga ahayn qaarkood waxay leeyihiin qodob dhigaya in hantida markii ururka la xiro lagu wareejinayo urur leh ujeedooyin la mid ah kuwiisa– [kan waa lagu soo dari karaa].

<p>jiray. Taa baddalkeedii, ururka aan dawliga ahayn ee caalamiga ah waa inuu sii heysto hantida hadii uu si dhab ah ugu baahan yahay. Mawqifka haatan jira ayaa laga yaabaa inuu ka horjoogsado ururada aan dawliga ahayn ee caalamiga ah inay maal galin ku sameeyaan hanti gudaha Soomaaliya.</p>	
--	--

Qodobka 28aad: Horumarinta Awoodda Ururada Aan Dawliga Ahayn ee Qaranka

Fikradaha ururada aan dawliga ahayn	Waxyaabaha ay soo jeediyeen ururada aan dawliga ahayn
<p>Ururada aan dawliga ahayn waxaa ay soo dhaweynayaan dadaalada loogu jiro sidii wax hoos looga soo dhisi lahaa ilaa kor. Hirgalinta maaliyad loogu talagalay awood dhisidda ururada aan dawliga ahayn ee qaran taasi oo dawladu hirgalinayso waxaa ay keeni kartaa danaha oo iska horimaantoodu ay dhammaan weydo. Maaliyadaasi aan la qeexin ee waajibka laga dhigay ah oo laga soo uruurinaayo ururada aan dawliga ahayn ee caalamiga ah oo lagu shubayo akoonka qasanadaan guud lama jaan qaadeyso sharuucda qoondeynta ee badi deeqbixiyeyaasha ama ururada aan dawliga ahayn ee caalamiga ah waxaana aysan la jaan qaadeyn dammaanad qaadyada sinnaanta iyo kala takoorid la'aanta.</p> <p>Si kastaba ha ahaatee, waxaa jira tillaabooyin kale oo Qodobkaan uu meesha ku soo dari lahaa si loo taageero hoggaanka ka qeybgaleyaasha maxaliga ah iyo kuwa qaran.</p>	<p>Waa in lagu tala bixiyo in gebi ahaanba meesha laga saaro qodobkaan.</p> <p>Ha la soo jeediyo in meesha la galiyo qodob cusub:</p> <p>Xafiiska Xiriirinta Hawlaha ururada aan dawliga ahayn, ee uu xukumo Guddiga ururada aan dawliga ahayn waa inuu taageero soo uruurinta macluumaadka iyo in si joogto ah loo soo daabaco macluumaad ku saabsan qulqulka maaliyadda oo ay kujiraan macluumaad ku saabsan sida fangareyn badan oo ka imaanaysa deeqbixiyeyaasha ay ugu qulquleyso hayadaha dawliga ah, ururada aan dawliga ahayn ee caalamiga ah, ururada aan dawliga ahayn ee maxaliga ah iyo kuwa qaran iyo waliba Ururada Xaquuqda ee Dumarka. Tani waa wax ku bineynta ama ku dhisidda UJEEDOOYINKA jira ee shaqada hoos imaanaysa Wasaarada Qorsheynta. Xogtaan waa in dadweynaha oo dhami ay heli karaan ayna ku taageerto ka qeybgaleyaasha sidii ay ku gaari lahaayeen waajibaadyada caalamiga ah ee wax kasoo dhisidda min hoos illaa kor. Xafiiska Xiriirinta Hawlaha ururada aan dawliga ahayn ee Guddiga ururada aan dawliga ahayn uu xukumo kadib markii uu wada tashi la sameeyo ururada aan dawliga ahayn waxaa uu hirgalin karaa siyaasado taageera wax hoos ka soo dhisidda hadii macluumaad uu go'aamiyo in waajibaadyada caalamiga ah aysan deeqbixiyeyaasha</p>

	iyo ururada aan dawliga ahayn ee caalamiga ah aysan dhawreyn.
--	---

Qodobka 29aad: Xeer-nidaamiyeyaal

Fikradaha ururada aan dawliga ahayn	Waxyaabaha ay soo jeediyeen ururada aan dawliga ahayn
29.3 waadax ma ahan waana in wax laga baddalo si loo xaqiijiyo in ciqaabaha si waadax ah loogu qoray xeer-nidaamiyeyaasha gudahooda aana loo adeegsan garashada garsoorka.	Si waadax ah ugu qora xeer-nidaamiyeyaasha oo yaan loo adeegsan garasho garsoor

Qodobka 30aad: Waqtiga Ku-meel Gaarka ah

Fikradaha ururada aan dawliga ahayn	Waxyaabaha ay soo jeediyeen ururada aan dawliga ahayn
30.2 waxaa uu u adeegsanayaa dhammaan ururada jira habraacyada dib isu diiwaangalinta waqti kooban gudihii (90 maalmood), ama waa inay u bareeraan in diiwaanka laga tiro. Tani waa xaddidaad aan caddaalad ahayn oo lagu soo rogayo ururo oo cabburisa xorriyada isku xirnaanta dadka.	Qodobku waa inuu tixgaliyo diiwaangalinta ururada jira si waafaqsan dhaqanka ugu wanaagsan waxaana uu ka faaiideysan karaa qod. 11 (4) kaasi oo saamaxa in Xafiiska Xiriirinta Hawlaha ururada aan dawliga ahayn, ee Guddiga ururada aan dawliga ahayn uu xukumo uu codsado xog dheeraad ah oo loogu talagalay qorsheyaasha diiwaangalinta oo qura meeshii uu u arko muhiim si caddaalad ah.

Qodobka 31aad: Wax ku oolnimada

Fikradaha ururada aan dawliga ahayn	Waxyaabaha ay soo jeediyeen ururada aan dawliga ahayn
Ma cadda sababta Qodobkaan uu uga soocayo taariikhda hawlgalka (qod. 30.3) taariikhda dhaqangalidda (qod. 31) maadaama arintaan ay jahwareer keeneyso laakiin ay tahay in la iswaafajiyo.	Is waafajiya taariikhaha hawlgalka iyo dhaqangalka.

Qodobka 32aad: Luuqada Qodobkaan

Qodobka 33aad: Xeer-nidaamiyeyaal

Qodobka 34aad: Lifaaqa Kowaad

Qodobka 35aad: Lifaaqa Labaad

Qodobka 36aad: Lifaaqa Saddexaad

Fikradaha ururada aan dawliga ahayn	Waxyaabaha ay soo jeediyeen ururada aan dawliga ahayn
Qarashka ku xusan lifaaqa waa in si waadax ah Xeerka loogu qeexo, ama xeer-nidaamiyeyaasha, ka hor bilaabidiisa si looga fogaado in siyaabo badan wax loo fasiro loona xaqiijiyo dabbaqid isku mid ah.	Si waadax ah u qeex qarashka

Xog dheeraad ah oo loogu talagalay Qodobka 6: Tusaaleyaasha qaab-dhismeedyada Guddiga Xafiiska ururada aan dawliga ahayn:

- *Xeerka Ururada Aan Faaiido Doonka ahayn ee South Africa, 1997:*
 - *waxaa uu bixinayaa kulug lahayiin dadweyne oo ah dhanka soo magacaabidda Guddiga NPO:*
 - *baaq dadweyne oo loogu talagalay soo magacaabidda (xubnaha guddiga);*
 - *Liiska xubnaha lasoo magacaabay oo lasoo daabacay si fikrado looga soo dhiibto;*
 - *Wada tashiyo ballaaran oo lala yeelanayo dadweynaha ayaa qasab ah.*
 - *Xubnaha guddiga ayaa waxaa uu ka koobnaan doonaa Guddoomiye, Guddoomiye Ku-xigeen, 2-3 kale oo wakiil iyo ugu yaraan 2 wakiil oo ka socda ururada aan dawliga ahayn. [ka taxadar in si xad dhaaf ah uusan u matalin guddiga fulinta/wasiiro.]*
 - *Sharuudaha xubnaha Guddiga:*
 - *Khibrad la caddeeyay oo ah dhanka takhasuska munaasabka ah*
 - *Inuu qofku yahay muwaadin*
 - *Aad u dhaqan wanaagsan daacadnimo la caddeeyayna leh*
 - *Muddada xilka xafiiska la heynayo: 3-4 sano muddo ah markiiba ayadoo uu xaq u leeyahay in dib loosoo magacaabo hal mar oo kale. Ka qaadida xilka xafiiska ee xubin ka tirsan guddiga waxay un ku imaan kartaa inuu asagu qofku is casilo asagoo qoraal istiqaaloo soo*

gudbinaaya ama, Wasaarada (Qorsheyntu) inay xilka ka xayubiso ayadoo sabab jirta u cuskanaysa taasoo ah: Dembi in maxkamadi ku heshay, inuu shaqadiisii uu awoodi waayay inuu guto, dano iska soo horjeeda, iyo inuu falismo ama uu kaco dhaqaale ahaan(uu bayhofo). Xubin ka tirsan guddiga waxaa uu xaq u leeyahay in si sharci ah dib loogu eego xil ka qaadida lagu sameeyay/ama racfaan.

- *Itoobiya, waxaa jirta Hay'ada Ururka Bulshooyinka Rayidka ah oo leh shakhsiyadeeda sharci lehna qaab-dhismeed qeexan kaasi oo u baahan ujeedooyinkeeda, awoodaheeda iyo shaqooyinkeeda, uruursanaanteeda, xubnaha Guddiga, awoodaha iyo shaqooyinka Guddiga, mudada ay xilka xafiiska ay haynayaan xubnaha Guddiga oo waafaqidda habraacyada Guddigana waxaa lagu xusay Caddeynta Ururka Bulshooyinka Rayidka ah.*
- *Kenya qaabka shaqo ee Xeerka ah ee ururada aan dawliga ahayn, Guddiga Xiriirinta ururada aan dawliga ahayn ayaa ah guddi shirkad ah asagaas ayaana jira, waxaana maareeya guddi inta uu ka kooban yahay lagu sharraxay gudaha Qodobka. Habraaca shirarka Guddiga, shaqooyinka Guddiga iyo awoodaha Guddiga waxaa sidoo kale lagu sharraxay gudaha Qodobka.*
- *Guddiga mushaaraatka iyo gunnooyinka. Xulashooyin xoogaa ah: Qodobka ururada aan dawliga ahayn ee Uganda – mushaaraatka iyo gunnooyinka waxaa go'aamiya Wasiirka kormeerka oo arimahaas kala tashada Wasaarada Maaliyada. Itoobiya – Qof xubin ka ah Guddiga xaq uma lahan mushaar ama gunno hadii qodob xaq u lahaanshahiisa mushaar ama gunno aan loo samayn si waafaqsan Xeerka. Qarashaatka loo siiyo xubnaha Guddiga inay ka qeybgalaan shirar looma tixgalinaayo sidii mushaaraat ama gunnooyin oo kale.*

..